



Barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka Khuraafaadka & Xaqiiqooyin

Khuraafaadka

Barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) waa deeq waxbarasho.



Barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) wuxuu bixiyaa kharashka wax walba: kharashka waxbarashada, hoy-yenta, buugaagta, cuntada, iwm.



Waxaan kaliya ku isticmaali karaa lacagaha Barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) kulleejyada la dhigto afarta sano.



Waxaan si toos ah u heli doonaa lacagaha Barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) sannad kasta.



Waxaan kaliya isticmaali karaa lacagaha barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) muddo afar sano ah.



Ma heli karo lacagaha barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) haddii aanan wax sharcii lahayn.



Ma isticmaali karo lacagaha barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) haddii aan qaato muddo nasasho kadib dhameynta dugsiga sare.



Xaqiiqooyinka

Waa barnaamij kaalmo maaliyadeed oo uu gobolku bixyo kaas oo la shaqeeya kaalmooyinka kale (sida [Deeqda Waxbarashada Kulleejka ee Washington \(Washington College Grant\)](#)) si ay caawinaad uga geystaan bixinta ardeyga ee qaar ka mid ah kharashyada kulleejka.

Barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) wuxuu caawinaad ka geysan karaa bixinta kharashka waxbarashada, qaar ka mid ah khidmadaha, iyo lacag yar oo loogu talagalay in lagu soo iibsado buugaagta. Ma daboolayo dhammaan kharashyada kulleejka.

Lacagaha Barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) waxaa lagu isticmaali karaa in ka badan [60 dugsi oo ku yaal Washington](#), oo ay ku jiraan kulleejyada bulshada, dugsiyada farsamada, iyo kulleejyada la dhigto labada sano iyo afarta sano labadaba!

Laga bilaabo sanadkaaga ugu dambeeyaa ee dugsiga sare, iyo sannad kasta oo aad dhigato kulleejka, waa inaad gudbisaa [FAFSA \(Free Application for Federal Student Aid, Codsiga Bilaashka ah ee Kaalmada Ardeyga ee Federaalka\)](#) ama [WASFA \(Washington Application for State Financial Aid, Codsiga Kaalmada Maaliyadeed ee Gobolka Washington\)](#) oo aadna buuxisaa [shuruudaha bärnaamijka](#) ee ku saabsan dakhliga qoyska, deganaanshaha, iyo horumarka tacliimeed si aad u sii ahaato mid u sii u-qalma.

Ardayda u qalma waxay isticmaali karaan lacagaha barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) ilaa lix sano (18 seddex-bilood ama 12 simirtar), ama ilaa ay ka helaan shahaadada koowaad ee jaamacadda, midba midka soo hor maraa. Ardaydu waa inay iska-diiwaangeliyaan dugsi ama goobo tabbabar gudaha hal sano kadib qalinjebinta dugsiga sare.

Haddii aad buuxiso shuruudaha bärnaamijka iyo deganaanshaha gobolka, waxaad heli kartaa lacagaha barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound)! Kaliya buuxi [WASFA](#) bedelkii aad buuxin lahayd FAFSA.

Waad qaadan kartaa sannad fasax ah! Kaliya hubi inaad iska diiwaangeliso kulleej gudaha hal sano kadib qalinjebinta dugsiga sare.

